

Rugta aqoonta ee caafimaadka galmada • Kunskapscentrum för sexuell hälsa


Baaritaanka unuga

Cellprovtagning



Baaritaanka unugu nolosha ayuu badbaadiya! Waad ka hor tagi karta kansarka ilmo galeenka ku dhaca hadii aad tagto baadhitaanada unuga ee lagu sameeyo dumarka. Arintani waxay khusaysa xita hadii laga talaalay kansarka ku dhaca ilmo galeenka.

Cellprov räddar liv! Du kan undvika att få livmoderhalscancer genom att du går på varje gynekologisk cellprovtagning. Det gäller även om du är vaccinerad mot livmoderhalscancer.



Unugyadda marinka ilmo galeenkaagu way is badali karaan oo waxay noqon karaan kansar adiga oo aan dareemin. Marka lagaa qaado baadhitaanka/tijaabada unuga waxa la arkaya hadii uu jiro isbedel oo waa la joojinaya.

Celler i din livmoderhals kan förändras och utvecklas till cancer, utan att du märker det. När du tar ett cellprov kan förändringarna hittas och tas bort.



In lagaa qaado baadhitaanka unuga waa lacag la,aan.

Att lämna cellprov är gratis.



Waxa baadhitaanka kaa qaadayasa umuliso ku sugan goobta umulisooyinka dadka ku qaabilaan.

Det är en barnmorska på en barnmorskemottagning som tar provet.




Waxaad iska saari doonta dharka aad hoosta ka gashan tahay, kadibna waxaad ku fadhisan doonta kursiga baadhitaanka lagu sameeyo.

Du får ta av dig på underkroppen och sätta dig i en undersökningsstol.

Rugta aqoonta ee caafimaadka galmada • Kunskapscentrum för sexuell hälsa

Baaritaanka unuga

Cellprovtagning




Umulisadu waxay kaa qadaysa baadhitaanka unuga oo ay kasoo qadayso marinka ilmo galeenka iyadoo la isticmaalayo burush yar oo jilicsan iyo alad yar oo badhitaanka lagu sameeyo. Dadka inta badan waxay sheegen inaanay xanuun samaynayn laakiin qaarkood ayaa dhibsada/karahiyaaysta.

Barnmorskan tar cellprovet från livmoderhalsen med hjälp av en liten mjuk borste och en spatel. De flesta tycker inte att det gör ont, men en del kan känna lite obehag när provet tas.



Qaadida tijaabadu/baadhitaanku waxay qaadata inta badan hal daqiiqo. Hadii aad rabtid in cidi kusoo raacdo waala caadi/la ogolyahay.

Själva provtagningen tar ofta bara en minut. Vill du att någon följer med dig, så går det bra.



Baadhitaanka unuga lama samayn karo hadii aad caadad leedahay. Markaa waxaad qabsanaysa balan kale.

Du ska inte lämna cellprov om du har mens. Då får du boka en ny tid.



Hadii aanu wakhtigu kugu haboonayn waxaad wakhti kale ka qabsan kartaa bogayaga internatka. Ciwaanku/adaraysku wuxu ku qoran yahay warqada balanta.

Om tiden inte passar kan du boka en ny tid på webbplatsen. Adressen står på kallelsen.



Warqad ayaa guriga kugu imanaysa ay ku qoran tahay jawaabti baadhitaanku. Warqadu waxay ku qoran tahay afka iswidhishka waxayna kuu imanaysa sadex bilood gudahood. Mar marka qaarkood ayaa loo bahan kara in baadhitaan cusub lagu sameeyo. Marka waxa lagu soo diraya balan cusub.

Du får brev hem med svar från provtagningen. Brevet är på svenska och kommer inom tre månader. Ibland kan du behöva lämna ett nytt prov. Då får du en ny kallelse.